

# Aftida Taageraysa Miisaaniyadda Horumarinta Xadiiqadaha Warbixinta Muddada Dhexe



*Warbixinta ku saabsan afarta sano hore ee miisaaniyadda horumarinta*

## Waraq ka socota Guddiga Kormeerka

### Dadweynaha Seattle,

Waxaan idinkaaga mahad celinaynaa kumanaanka saacadood ee aad isku hawliseen Aftida Taageraysa Miisaaniyadda Horumarinta Xadiiqadaha, iyadoo aan ku qanacsanahay guulashii aynu gaarnay, waxaynu idiin soo gudbinaynaa warbixintan la xiriirta afarta sano ee hore ee hawlaha miisaaniyadda horumarinta.

Dhismaha iyo fulitaanka \$198.2 malyan ee miisaaniyadda horumarinta ah waxaa ay marqaati ka tahay sida dadweynaha Seattle ay u danaynayaan xadiiqadaha iyo goobaha bannaan. Afarta sano ee hore, waxaynu dusha ka aragnay dhammeystirka in ka badan 40 ka mid ah 90-iyo dhowr mashariic ee miisaaniyadda lagu horumarinayo xadiiqadaha xaafadda, xarumaha jaaliyadaha, duurka, gegida ciyaaraha, meelaha bannaanka ah ee eeyaha loogu talagalay, meelaha ay carruurta ku ciyaaraan, buuraha bushkaleetiga loogu talagalay, meelaha ay dadka ku kulmaan, bandhigyada farshaxanka ee lagu lugeeyo, aqallada badbaadada, iyo suuliyada dibedda ku yaal. Intaa waxaa raacsan, waxaynu haysanaa dhul bannaan oo gaarayo 34 hektar. Si joogta ah ayeeynu ula fajaacnaa dadaalka dheeraadka ah ee ay geysteen dadka reer Seattle ee jecel xadiiqadaha. Waxaa tilmaan gaar ah leh dadaalka aad ka gaysateen magacaabista taageerada mashaariicda Fursadda Maalgelinta (Opportunity Fund).

Waxaynu aad ugu faraxsanahay qiimaha ka soo if-baxay maaliyadda horumarinta iyo dhaqangelintiisa iyadoo qalab waxtar leh loo adeegsanayo mashaariicda dhismaha, baritaanka dabaasha carruurta Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle si ay biyaha iyo noloshaba si badbaado leh ugu raaxeystaan, baritaanka kumanaan arday in ay ku raaxeystaan noloshaba dabiiciga ah ee magaalada gudaheeda, iyadoo la daryeelayo duurkeenna xasaasiga ah, iyo in carruurta iyo dhalinta loo helo meelo ay ku bartaan munaafacaadka caafimaadka iyo isboortiga firfircoon.

Waxaynu aad ugu faraxsan nahay in aynu dusha ka kormeerno barnaamijka miisaaniyadda horumarinta oo waddo fiican ku taagan, xag maaliyad iyo nidaam taariikheedba, iyo lacagta doolarka ah ee sida taxaddirka leh loo kharash gareeyo.

Waxaa ay ahayd arrin qaddarin iyo farxadba leh si aynu uga qayb qaadanno kormeerka dhaqangelinta miisaaniyadda horumarinta iyadoo aynu kala qayb qaadanayno dadweynaha Seattle ee fahansan in xadiiqadaha ay leeyihiin muhiimado dhowr ah— in degganaan lagu helo, jirdhis, bandhigga farshaxanka, iyo, sida ay ugu magacaabeen walaalaha Olmsted goortii ay naqshadeeyeen lafdhabarka qaab xadiiqadeedka sannadkii 1903, meelaha cagaaran oo looga baxsado sawaxanka noloshaba magaalo.

Fadlan fiiro gaar ah u yeelo Warbixinta Miisaaniyadda Horumarinta ee Sannadka 2005 ee soo socota. Waxaynu rajeynaynaa in aynu sii wadno in aan idinla sii shaqeyno illaa sannadka 2008, sannadka ugu dambeeya ee miisaaniyadda horumarinta, si loo dhammeystiro mashaariicda xaafaddaada ee noloshada si wanaagsan u saameynaya kaasoo ka dhex dhisaya bulshada, meelo la isugu yimaado, iyo u xafadeynta kala duwanaashada dadweynaha oo ah quwadda ugu weyn ee magaalada.

Mahadsanid,  
Guddiga Kormeerka Miisaaniyadda Horumarinta Xadiiqadaha

Guddiga Kormeerka Miisaaniyadda Xadiiqadaha safka hore bidix ka billaw illaa midig: Cheryl Klinker, Russ Brubaker, Joyce Moty, Lisa Chun; safka dambe bidix illaa midig: Terry Holme, Alec Stephens, Don Harper, Doug Dunham, Jeff Hou, Neal Adams; dadka aan sawirneyn waxaa ka mid ah: Alan Alabastro, Maisha Barnett, Philippe Jeoffroy, Sharon Lee, Peter Lukevich, Adrian Moroles.



# Dhismaha mustaqbal fiican



## Yaree, Dib u isticmaal, Dib u Warshadee

Miisaaniyadda waxaa ay abuurtaa fursado soo dhaweyn leh ee soo bandhigaya dadaalka joogtada ah ee waxtarka leh ee magaalada.

Xadiiqadaha waxaa haatan ka mid ah dhammaan mashaariicda raasimaalka iyo Mashruuca Waxtarka leh ee Dhismaha kaasoo ka qayb gelinayo xubnaha bulshada wada-hadallada dhismaha, islamarkaana xoogga saarayo kharashyada ugu yar nololsha mashruuca, iyo kordhinta munaafacaadka dadweynaha ay ka helayaan.

Waxyaabahani waxaa ay kordhinayaan waxtarka cilmiga xiriirka noolaha iyo bey'adda ee biyo mareenka iyo duurka, dhimista waxyeellada bey'adda, dhimista kharashyada hawlaha iyo dayactirka, iyo helitaanka meel caafimaad iyo badbaado leh ee la isugu yimaado.

## Maamulka Bey'adda

Miisaaniyadda horumarinta waxaa ay xaqiijinaysa maalgelinta xadiiqadaha si loo helo waxbarasho bey'adeed iyo fursado maamul, iyo in laga saacido Xadiiqadaha in ay tusaale fiican u noqdaan dadaalka loogu jiro bey'adda. Afarta sano ee hore ee miisaaniyadda horumarinta, Xadiiqadaha waxaa ay :

- ♦ u ku siyaadiyeen curiyeyaal bey'adeed xeryo-maalmeedyada xagaaga dhammaantooda 25 xurumo bulshadeed, oo haatan u adeega 500 carruur toddobaadkii;
- ♦ ku soo siyaadisay 3,500 carruur barnaamijyada waxbarashada bey'adda sanad kasta,
- ♦ dib loo eegay sagaal ka tirsan tilmaamaha "Hawlaha Maamulka ugu Wanaagan" xasaasiyadda bey'adda iyo sida Xadiiqadaha u shaqeyaan, iyo Waxaa ay tababareen shaqaalaha, iyo
- ♦ waxaa ay si habboon u adeegsadeen \$350,000 si wax loogu siyaadiyo barnaamijka.

## Farshaxanka Wakhtiga

1% ee Barnaamijka Farshaxanka waxaa uu ahaa dhaqan soo jiraa ee ay Seattle ku qabtay tan iyo 1973-dii, waxaana uu inagu soo biiriyey qaar ka tirsan waxyaabaha aynu sida aadka u naqaan iyo hawlaha aynu jecel nahay, oo ay ku jirto "Sadako iyo Kumanaanko Shimbirood" (Sadako and the Thousand Cranes) ee ku taal Xadiiqadda Nabadda (Peace Park), Buruslaha (Hammering Man) Matxafka Farshaxanka ee magaalada hoose Seattle (Seattle Art) iyo Qorraxda Madow (Black Sun) ee ku taal Xadiiqadda Iskaa Wax u Qabso (Volunteer Park).

Intii lagu kharash gareyn lahaa boqolkiiba hal miisaaniyadda mashruuc walba ee ka tirsan farshaxan kasta, Xadiiqadaha waxaa ay xusheen in ay marti galiyaan qorsheeyaha farshaxanka ee ka socda Xafiiska Farshaxanka iyo Arrimaha Dhaqanka in uu u soo naqshadeeyo Qorshe Farshaxan miisaaniyadda taal ee \$900,000.

Qorshaha waxaa uu xoogga saarayaa dhismaha farshaxanka abuuraysa jawi Ka duwan nololsha magaalada taasoo soo jiidaneysa curiyeyaal dabiici ah. Waxaa ka mid ah Miisaaniyadda mashruuc weyn ee farshaxan, miisaaniyad mashaariic yar yar ee farshaxanka, miisaaniyad sanadeed ee loogu talagalay "aqalka gudhiisa" horumarinta farshaxanka, iyo miisaaniyadda qoraaga halkaa ku nool ee qisooyin ka alifay niyadda iyo waayo aragnimada dadka ee xadiiqadaha.

## Fursadda Maalgelinta Dheeraadka ah

Markii ay dadweynaha Seattle oggolaadeen \$198.2 milyan ee Miisaaniyadda Horumarinta sannadkii 2000, waxaa ka mid ahaa Fursadda Maalgelinta oo loogu talagalay kharashyada lama filaanka ah ee mashaariicda horumarinta iyo fursadaha lagu iibsano dhulalka. Guddiga Kormeerka Dadweynaha ee Miisaaniyadda Horumarinta Xadiiqadaha waxaa ay soo saareen nidaam lagu qiimeynayo laguna xulayo mashaariicda Fursadda Maalgelinta, oo ku saleysan hoggaanka Golaha Magaalada ee qaabilsan shuruudca miisaaniyadda.

Guud ahaan, muhiimadda hore ayaa la siiyey mashaariicda xadiiqadaha ama goobaha bannaan ee dayacan iyo meelaha uu dhismaha ka socdo, gaar ahaan meelaha loogu talagalay ee Magaalada "bannaanka magaalada" ama "goobaha dib u kobcinta."

Waxaa ay inoo anfacaysaa bedbedel-ogida tixgelinta mashaariicda aan hore loogu fikirin xilligii qaabka loo yeelay miisaaniyadda horumarinta.

## Qiimaha Marka Loo Barbar Dhigo Maalgelinta

Waxaynu u eegnaa qiimaha maalgelinta laba nooc. Marka hore waxa la taaban karo, iyo waxyaabaha lagu raaxeysto ee deegaanka Seattle. Waxaa jiraan meelo bannaan oo cusub oo kayd ah, farshaxan cusub, meelo cusub ee lagu lugeeyo, meelaha lagu ciyaaro, meelaha cusub ee uu Fido si xorriyad leh ugu ciyaari karo, dhismooyin cusub ee loogu talagalay xafladaha iyo kulannada dadweynaha, iyo suuliyo la hagaajiyey. Mashruuc waliba waxaa uu wax ku siyaadiyaa tayada nololsha iyo noolaasha xaafadda.

Marka labaad, waxaa jira qiimo wadajir ah ee ay mashaariicda ku siyaadiyaan magaalada Seattle. Intaan xubinba mar goynayno, Xarig jar kasta kaddib, miisaaniyaddu qaab ayeey yeelanaysaa: Tani waxaa ay jiiika soo socda u tahay haddiyad waaraysa.



Xadiiqadda Goobta Bergen

### Waa uu ka Qiimo Badan Yahay Sidii Aynu Filaynay!

Haddii aad filaysid in Miisaaniyadda Horumarinta ay qiimaheedu ku egtahay \$198.2 malyan oo kaliya, waxaa laga yaabaa in ay kaa yaabiso in qaybta hore ee miisaaniyadda in loogu deeqay \$14 malyan oo kale!

- ◆ Deeqaha gaarka ah iyo kuwa shirkadaha waxaa ay suurageliyeen ballaarinta Xadiiqadaha Flo Ware iyo Homer Harris iyo goobta lag ciyaaro ee Cascade Playground.
- ◆ Maalgelinta King waxaa uu suurageliyey kaydinta dhulka uu maro webiga yar Thornton Creek, si loo cusboonaysiiyo garoonnada kubadda lagu ciyaaro iyo iibsiga dhul loogu talagalay xadiiqado cusub ee xaafadeed.
- ◆ Maalgelinta hagaajinta Magaalada ee Khasnadda Horumarinta Bulshada Alki (Alki Community Improvement Fund) waxaa ay saacidaad ka geysatay kaydinta hantida Deegaanka Dabiiciga ah ee Me-Kwa-Mooks.

### Kaligeenna ma Aynu Sameyn Kari Lahayn

Lacagta badankeeda ee ay canshuur bixiyeyaashu ay ugu deeqeen miisaaniyadda horumarinta, iyo maalgelinta ay kabayso, ma jiro mashruuc kaliya oo la dhammaystiri karay haddii aysan jirin hal abuur, dadaal, iyo dhididka dadka deegaanka, taageerayaasha, iyo dhiirrigeliyeyaasha. Waxaynu u mahad celinaynaa dhammaan hay'adaha deegaanka, Ururka Samafalka Xadiiqadaha Seattle (Seattle Parks Foundation), Xafiiska Farshaxanka (Office of Arts) iyo Hay'adda Arrimaha Dhaqanka (Cultural Affairs), Deegaanka King (King County), iyo dhammaan dadweynaha iyo hay'adaha gaarka ah ee inagala qayb qaata.

### 2000-2004 Warbixin Kooban 2000 Miisaaniyadda Horumarinta Xadiiqadaha – Horumarka Maaliyadeed

(Dhammaan lacagtu waa malaayiin)	Maalgelinta			Kharashka	Haraaga
	Miisaaniyadda Kale	Xisaabta Guud	Haraaga Guud	Haraaga Guud	Harsan
libsashada	\$26.0	\$9.1	\$35.1	\$23.2	\$11.9
Horumarinta	\$102.8	\$4.0	\$106.9	\$36.9	\$70.0
Fursadda Maalgelinta	\$10.0	\$1.2	\$11.2	\$4.4	\$6.8
Hawlaha & Barnaamij u Sameynta	\$61.4		\$61.4	\$24.7	\$36.6
<b>Haraaga Guud</b>	<b>\$200.2</b>	<b>\$14.4</b>	<b>\$214.5</b>	<b>\$89.2</b>	<b>\$125.3</b>

### Sawirka Guud: Aragtida Guud ee Maalgelinta

Miisaaniyadda horumarintani, waxaa maalgelinta la soo aruuriyaa iyadoo kharahshka la galo sannad kasta ee sideeda sano ee loogu talagalay.

(Dhammaan lacagtu waa malaayiin)

#### libsashada

libsashada Xadiiqadaha Deegaanka .....	\$16.0
libsashada Banaanka Cagaara .....	\$10.0
Xisaabta Guud .....	\$26.0

#### Horumarinta

Xadiiqadaha Deegaanka .....	\$52.8
Xadiiqadaha Deegaanka Muhiimka ah .....	\$23.1
Xarumaha iyo Goobaha Lagu Ciyaaro .....	\$17.9
Wadiiqooyinka .....	\$9.0
Xisaabta Guud .....	\$102.8

#### libsashada & Horumarinta/Fursadda Maalgelinta .....

\$10.0

#### Maamulka Bey'adda, Dayactirka Iyo Barnaamij u Sameynta

Xadiiqadda Cusub/Dayactirka Bannaanka Cagaaran .....	\$7.6
Maamulka Bey'adda .....	\$9.7
Xadiiqadda la Horumariyey & Dayactirka Xarunta .....	\$5.3
Barnaamij u Sameynta Madadaalada .....	\$16.9
Barnaamij u Sameynta Xadiiqadda Xayawaanka .....	\$21.8
<b>Xisaabta Guud .....</b>	<b>\$61.3</b>

**Isticmaalka Maalgelinta Guud .....** \$200.2

#### Meelaha Maalgelinta Laga Filayo

Dakhliga ka soo Galaya Miisaaniyadda Horumarinta .....	\$198.2
Dakhliga Korsarka .....	\$2.0

# Horumarinta nolosha dadkayaga ee dayacan 🌸



## Hoggaamiyayaasha Dhallinta

*“Dugsiga ma aan aadin sababtoo ah hore uma aan haysan qalabka dugsiga, balse maadaama aan haysto boorsadan wadata qalabka oo idil, waxaan isku dayayaa in aan dugsiga dib ugu laabto xilliga soo socda ee la billaabayo.”*

— Canug dhallinyaro ah oo dugsiga isaga haray

Kuwani waa mustaqbalkayaga, waxaana inagu waajib ah in aynu sida ugu wanaagsan uga qayb qaadanno inta ay baranayaan xirfadaha nolosha iyo hoggaaminta, ka soo bixidda waajibka waxbarashada, iyo noqoshada kuwo noloshada waxbarta. Si ay u suuragasho waxaa ay miisaaniyadda horumarinta bixinaysaa maalgelin loogu talagalay Horumarinta Hoggaamiyaha Dhallinta (Teen Development Leader) kuwaasoo laga helayo mid kasta ee ka mid ah 26-ka Xadiiqadood xarumaha bulshooyinka.

Waxaa ay miisaaniyadda u suuragelinaysaa Xadiiqadaha in ay bixiyaan hawlo si caadiyan ah qaab jadal leh lagu qabto ee loogu talagalay dhallinta ka tirsan xarun bulsho ee kasta; waxaa ay qiyaastii magaalada ka soo aruuriyaan 4,500 dhallinyaro sannad kasta iyo illaa 1,600 asbuuc walba. Hoggaamiyayaasha waxaa ay ka saacideen dhallinta in ay iskaashi barnaamijeed la sameeyaan golaha latalinta, ganacsiyada deegaanka, iyo hay'adaha aan dawliga ahayn, oo haatan gaaraya sideed illaa 35 goob kasta sannadkiiba. Iskaashiga lala yeelanayo shaqaalaha Xadiiqooyinka kale sida kuwa qaabilsan aqoonta dabiiciga iyo shaqaalaha wadiiqooyinka waxaa ay bixiyaan waxbarasho waayo aragnimo ee cayaar iyo dabiiciga-yaga. Waxaa uu qiimaha ku jiraa barnaamijyada dhisaya isku kalsoonaanta iyo awoodda shakhsiyeed ee sanooyinka ugu dhibka badan dhallinyarada.

## Baro Dabaasha

Magaalo ay biyaha ku hareersan yihiin waxaa ay carruurta ku baran karaan ku badbaadiista biyaha iyo in ay xilli hore dabaasha bartaan. Barnaamijka Baro Dabaasha ee Miisaaniyadda waxaa uu bixinayaa tikidh bilaash ah ee daruusta dabaasha ah oo loogu talagalay ardayda fasalka 3-aad iyo 4-aad ee dhigta dugsiyada Seattle, ha ahaado mid dawladeed ama mid gaar ah. Tan iyo markii uu billawday barnaamijkani, 22,613 arday ayaa dhammaysteen



daruusta. Kuwani, qiyaastii boqolkiiba 65 waa ay ku cusub yihiin dabaasha, iyadoo boqolkiiba 30 ay codsadaan dharka dabaasha ee bilaashka ah, kaasoo tilmaan u ah in ay baahi lacageed qabaan.. Kuwa iskaashiga ka geysta dadaalkani waxaa ka mid ah Isbahaysiga Ka-Hortagga Hafashada (Regional Drowning Prevention Coalition), Cusbataalka Carruurta (Children's Hospital), iyo Caafimaadka Dadweynaha – Seattle & Deegaanka King (Public Health – Seattle & King County).

## Dhallinyarada/Maalgelinta Horumarinta Dhallinta

Barnaamijkan hal abuurka leh waxaa uu iskaashi cusub la sameynayaa hay'adaha dibedda kaasoo u soo bandhigaya barbar dhig boqolkiiba 50 oo suuragelinaysa in kuwa bixinaya barnaamijyada kale ay barnaamijyo u sameeyaan, oo badankooda ku yaal xarumaha Xadiiqadaha. \$150,000 maalgelinta sannadkii waxaa ay suuragelinaysaa in la gaaro dadweynaha uusan gaarin ee qaba carruurta da'doodu u dhaxeysa 5 illaa 18, waxaana uu dhaliyey in ay abuurmaan in ka badan 40 iskaashi sannad kasta. Maalgelinta waxaa ay taageertay hawlaha Xafadaha Jinsiyadaha kala duwan ee Xarunta Seattle, Xarunta Jilitaanka Farshaxanka ee (Langston Hughes Performing Arts Center) muusikada xagaaga ee dhallinta (summer teen musical), iyo booqashada macallinka Meksikaanka uu ku booqday Xarunta Bulshada ee Xadiiqadda Koofureed (South Park Community Center).

## Dadka Weyn

Dhakhtarka waxaa uu Mary Ann kula taliyey in ay “dhaqdhaqaaq sameeyso” taasoo qayb ka ah daweynteeda kala goysyo xanuunka, sidaa awadeed waxaa ay billawday isku qorto qoob ka ciyaar, jirdhis, fursad bulshadeed bayaan ah, iyo qiime la awoodo. Waxaa ay ahayd sideed sano ka hor. Maanta waxaa ay si iskaa wax u qabso madax uga tahay fasallada qoob ka ciyaarka, waan qofka ugu horreysa ee kula talisa dadka fasalka dhigta in ay “sii wadaan.”

Iyadoo ka mid ah jiilka ubadka badan oo ku sii jeeda sanooyinkooda shaqo ka fadhiisiga, waa taxaddir in la qiimeeyaa baahida soo socota, tilmaanta dadweynaha iyo rabitaankooda, iyo qorshaha barnaamijyo cusub. Miisaaniyadda horumarinta waxaa ay u fasaxaysaa Xadiiqadaha in ay sidaa sameeyaan. Intaa waxaa dheer iyadoo uu ku kordhinayo boqolkiiba 50 barnaamijyada dadka weyn inta u dhaxeysa 2002 iyo 2004, waxaa ay Xadiiqadaha u hawlgaleen in baadigoobka iskaashi la sameynta ganacsiyada, Iskaashatada Caafimaadka Kooxda (Group Health Cooperative), Adeegyada Waayeelka ee Seattle/Deegaanka King (Senior Services of Seattle/King County), Xadiiqadaha Merrill (Merrill Gardens), Xarunta Jilidda Farshaxanka ee Langston Hughes (the Langston Hughes Performing Arts Center), iyo Khayraadka Horumarinta Caafimaadka (the Health Promotion Resource Center); si ay u martigeliyaan carwooyinka caafimaadka; si ay u shaqaaleeyaan dadka; in ay taageeraan “Mashruuca



Barnaamijka Xadiiqadda Xayawaanka Wildwise



Barkadaha Biyaha

Socodka Tallaabooyinka Dhawaaqa” (Sound Steps Walking Project)” iyagoo adeegsanaya qariidooyinka socda iyo tilmaamooyin kale; iyo in la gaaro dad oo taariikh ahaan aan ka qayb qaadan barnaamijyada dadka weyn.

### Gaadiidka Dhallinyarada

“Cajiib, hore weligay duurka uma arag!”

— Dhallinyaro safar duur joog ah ugu raacay Waqooyiga Cascades (North Cascades) Adeegga Xadiiqadaha Qaranka (National Park Service)

Furaha ka qayb qaadashada carruurta barnaamijyada wanaagsan waa iyadoo halkaa la geeyo. Miisaaniyadda waxaa bixisaa maalgelinta loo baahan yahay ee looga shaqeysiinayo looguna dayactirayo basaska xarumaha bulshooyinka iyo iibsashada basaska, doomanka, iyo tikidhada tareenka. Gaadiid ayeey helayaan dhallinta iyadoo aan loo eegin xaaladdooda dhaqaale, illaa iyo maantana waxaa ay suuragelisay 2,800 carruur in ay tagaan xarumaha xagaaga iyo safarrada duur joogga; 6,000 in ay uga qayb qaataan safarro dugsiiyeedka xilliga dugsiga; iyo 2,400 in ay Gobollada soo booqdaan. 11,000 carruur ayaa helay gaadiid lagu geynayo munaasibooyinka iyo barnaamijyada Adeegga Xadiiqooyinka Qaranka (National Park Service), EarthCorps, Xarunta Sayniska Basiifkada (the Pacific Science Center), Mashruuca Waayo Aragnimida Miyuusiga (the Experience Music Project), Xadiiqadda Kuliyadda Olympic (the Olympic Park Institute), Awoodda Rajada (Power of Hope), Kuliyadda Dhibcaha Iftiinka (the Points of Light Institute), iyo kuwo kale.

### Helitaanka Barnaamijka Carruurta

“Haddii aan ahay hooyo kaligeeda carruurta korsata islamarkaana ardayad ah, ma aysan ii suurageli lahayn haddii aysan ahaan lahayn Xarunta Bulshada Montlake (Montlake Community Center.) Deeqda waxbarasho ee Barnaamijka Dugsiga Ka Hor iyo Kaddib (The Before and After School Program) waxaa uu ii suurageliyey in aan shaqo raadsado.”

—Waalid Ku Tirsan Barnaamijka Dugsiga Ka Hor iyo Kaddib Ka Qayb Qaateyaasha Barnaamijka

Laga billaabo 2001 illaa 2003, maalgelinta Miisaaniyadda Horumarinta Xadiiqadaha waxaa ay Barnaamijka Dugsiga Ka Hor iyo Kaddib ugu deeqday deeq waxbarasho in ka badan 1,000 carruur, lacag garaysa \$670,000.

### Barnaamijyada Xadiiqadaha Xayawaanka

“Waxaynu si aad ah ugu faraxsan nahay in aad soo booqateen dugsigayaga oo aad inaga saaciddeen xirfadaha caafimaadka. Waad ku mahadsan tihiin in aad dabiiciga inooga dhigteen wax aynu ku raaxaysanp!”

—Ardayga Barnaamijka Wildwise (Wildwise Program Student)

Xadiiqadda Xayawaanka ee Woodland waxaa ay ku soo jiidatay carruur aad u badan barnaamijyadooda Sahmiyeyaasha Duurka (Forest Explorers), Badbaadiya Shimbiraha-yaga ee Cajiibka ah (Save Our Amazing Raptors - SOAR), iyo barnaamijyada WildWise — 7,900 tan iyo markii ay miiisaaniyaddu billaabatay. Sidoo kale barnaamijka lacagta qadada qiimaha jaban, tirooyinka waxaa ay si dhab ah uga tarjumayaan baahida dhaqaale: Xadiiqadda xayawaanka waxaa ay 43,542 carruur ugu deeqday barnaamijyada waxbarashada si ay wax uga bartaan dunida dabiiciga ah iyo muhiimadda kaydinta.

### Kuusota Bishaani (Wading Pools)

Misaaniyadda waxaa ay taageeraysaa barnaamijkan caanka ah ee xagaaga loogu talagalay iyadoo maalgelinaysa kordhinta saacadaha maalintii iyo tirada maalmaha xagaaga ay Xadiiqadaha ka furan yihiin barkadaha biyaha ee Seattle. Barnaamijkan badbaadada leh ee xagaaga waxaa uu siinayaa shaqaalaha soo dhammeystay tababarka iyo shuruudaha shahaadada sida ku cad Xeerka Caafimaadka Gobolka ee Xarumaha Madadaalada Biyaha. Carruurta ayuu qaboojinayaa islamarkaana badbaadinayaa, biyaha ayuu kaydinayaa, waxaana uu gaarayaa dad kala duwan iyadoo uu ka saacidayo dadka deegaanka in ay kulmaan oo ay isbartaan.



Kuusota Bishaani (Wading Pools)

# Dhawritaanka heerka sare ee xadiiqadaha yaga 🌸



Xadiiqadda Dariiqa Furan

## Dayactirka Geedaha: Shaqaalaha Seddexaad

Ku siyaadinta shaqaalaha seddexaad ee geedaha waxaa uu aad wax ugu kordhiyey awoodda Xadiiqadaha lagu dayactiro laguna daryeelo 140,000 geed ee sida aadka ah looga isticmaalo xadiiqadaha. Waxaa ay kordhinaysaa boqolkiiba 50 awoodda lagu dayactirayo iyadoo uu sameynayo jadwal lagu dayactiro, qaab lagu dabagalo hawlaha geedaha, iyo qaab lagu maamulo geedaha halista keenaya.

Afarta sano ee hore ee miisaaniyadda, Xadiiqadaha waxaa ay gaareen in ay dhammeystiraan boqolkiiba 48 ay kordhiyaan hawlaha laga codsado; waxaa ay soo baareen geed kasta ee ku yaal 45 xadiiqadood, oo aan hore u suuragal ahaan jirin; waxaana ay ka gudbeen qaabka jawaabta degdegga ah iyagoo u gudbay 10-ka sano simidda geedaha. Tallaabooyinkani waxaa ay Xadiiqadaha ka saacidayaan in ay ka soo kabsadaan sanooyinka la

dayacay dayactirka, taasoo horumarinaysa caafimaadka iyo nololaha 1.3 milyan geed ee Seattle ku yaal.

## Shaqaalaha Goobaha Dabiiciga ah

Shaqaalaha waxaa ay awood taageero u yihiin shaqaalaha Xadiiqadaha si looga shaqeeyo goobaha dabiiciga ah, dhismooyinka iyo dayactirka wadiiqooyinka, iyo taageeridda dadaalka maamulka iskaa wax u qabso.

Illaa iyo maanta, waxaa ay shaqaalaha sidoodii ku soo celiyeen 9.6 hektar oo dhul ah, waxaa ay beereen 5,300 geed, waxaa ay qiyaastii 100 xadiiqadood ka taageereen 11,000 saacadood ee hawsha iska wax u qabso, waxaana ay bixiyeen taageerada wadaagga dhulka ee Iskaashiga Seattle ee Duqa Magaalada Nickels.

## Muuqaalka Dhirta/Garoonka Ciyaarta Shaqaalaha Dayactirka

Shaqaalaha waxaa ay sare u qaadeen heerka muuqaalka dhirta iyo garoonnada kubadda ee xadiiqadaha, taasoo ah shaqo gacmeed ee xooggan. Illaa iyo maanta waxaa ay shaqaalaha dhammeystireen 34 mashruuc ee garoonnada kubadda, waxaa ay dayactir dheeraad ah ku sameeyeen garoonnada la isticmaalo lix illaa sideedii asbuuc, waxaana ay taageereen lix ka mid ah hawlaha iskaa wax u qabso. Intaa waxaa dheer, waxa ay dhammeystireen 38 mashruucyada muuqaalka dhirta oo ay ku jiraan hagaajinta salka laamaha, goynta geedaha faafa, caleemaha, simidda, sameynta dariiqyada, miro abuurka, iyo hawo siinta. Maalgelintani waxaa ay Xadiiqooyinka u fasaxaysaa in si heer sare ah loo dayactiro xadiiqooyinka gaarka, kordhinta badbaadada iyo ciyaaraha garoonnada kubadda, iyo in la buuxiyo baahida dadka iskaashiga geysta iyo kuwa deegaanka si loo taageero mashaariicda iskaa wax u qabso.

## Dayactirka Dheeraadka ah ee Xadiiqadda

Misaaniyadda horumarinta waxaa ay abuurtaa shaqaale taasoo macnaheedu yahay in Xadiiqadaha iyo suuliyada si joogta ah loo nadiifinayo xilliyada iyo wakhtiyada sida aadka ah loo isticmaalo. Tirada



Green Lake Park



Garoonka Ciyaarta Othello



Shaqaalaha iyo Iskood Wax u Qabsedeyaasha

Tilmaan bixiyaha cusub ee Tilmaanta Baaritaanka Xarunta (Facility Inspection Manual) waxaa uu leeyahay qaab lagu cabbiro nadaafadda dhismooyinka iyo tilmaanta waxyaabaha shaqaalaha laga doonayo, iyadoo joogtaanka shaqaalahani ay u fasaxayso shaqaalaha madadaalada in ay xoogga saaraan barnaamijyada iyo adeegga macaamilka.

### Barkadaha Dabaasha oo Nadiif ah

“Qolka alaabta la gashto haatan waa uu ka nadaafad badan yahay sidii hore,” ayuu qoray macaamil faraxsan. “Fadlan u mahad celi shaqaalaha dayactirka.” Barkadaha dabaasha ee Seattle in muddo ah ayeey doonayeen shaqaale dheeraad ah si ay barkadaha nadiif looga dhigo iyo tageerada xilliyada fasaxa haddii ay wax halaabaan. Shaqaalaha ay miisaaniyaddu maalgelisyay intaa iyo in ka badan ayeey sameeyaan: isticmaalka cusub ee Tilmaan Bixiyaha Barkadaha Dabaasha ee amraya baaritaan aragti iyo qoraal iyo heerarka, aad ayeey u nadiifiyaan dhismooyinka, taageeraan munaasibooyinka, iyagoo qayb ka qaadana marka barkadaha sida aadka ah loo isticmaalo.

### Kharashyada Xarumaha Cusub

Inta dhismooyin iyo dhulal cusub la iibsano iyo inta ay mashaariic cusub laga dhammeystirayo xadiiqooyinka, waxaa ay miisaaniyadda horumarinta qabanaysaa hawlaha dayactirka.

xadiiqadaha la nadiifiyo xilliga uu dadka ku badan yahay waxaa ay ka sara marta 52 sannadkii 2002 iyadoo noqotay 98 sannadkii 2004. Shaqaalaha waxaa ay sameeyaan qashin aruuris dheeraad ah, waxaa ay taageeraan munaasabooyinka bulshada, waxaana ay aad u nadiifiyaan barkadaha iyo halka laga soo galo xadiiqooyinka. Waxaa ay ku siyaadisay in u dhiganta qiyaastii 10 qofood, iyadoo isku darka shaqaalaha ay waxqabad dheeraad ah ay keentay. Shaqaalaha, waxaa ay haatan gashtaan dhar calaamad u ah shaqaalaha Xadiiqooyinka, taasoo soo dhaweyn wanaagsan xadiiqooyinka u leh kana saacidaya dadka xadiiqooyinka yimaada in su'aalhooda laga jawaabo.

### Nadiifinta Xarunta Bulshada

Xadiiqooyinka waxaa ay qabaan shaqaale ay si waxqabad leh u maalgeliso miisaaniyadda, si xarumaha Xadiiqooyinka ay u noqdaan nadiif, qaasatan marka la isu diyaarinayo xilliyada ay mashquulka yihiin. Waxaa ay xoogga saarayaan goobaha sida aadka ah loo isticmaalo sida halka laga soo galo, suuliyada, qolalka kulanka, dhulka garoonka ciyaaraha, iyo daaqadaha. Sidoo kale dhulka ayeey dhaqaan, faakiyuum-gareeyaan, boorka qaadaan, darbiyada ayeey nadiifiyaan, alaab soo iibiyaan, waxaana ay taageeraan munaasibooyinka.



# Iibsashada xadiiqooyinka cusub iyo dhismaha kuwo cusub



## GAAR U AH SEATTLE

*“Seattle oo kaliya ayeey ka suuragashaa,” ayuu yiri daawadeyaasha midkooda,” in laga suubiyo xadiiqooyin dhul biyoodka carrada lagu buuxiyo, saldhigyo militari, iyo hawada dayuuradaha oo dariiqyada dul maraya.” Miisaaniyadda waxaa abuurta fursado noocyo kale ah ee lagu sameynayo iskaashiy, deeq aruurin, iyo dhismaha xadiiqooyinka. Waxa ka mid ah kuwa soo socda.*

### Xadiiqadda Homer Harris

Xadiiqaddani waxaa ay dib u micno gaar ah u siinaysaa “xaafadda.” Maanta, iyadoo ay ugu wacan tahay deeq bixiyaha deeqsiga ah, Miisaaniyadda Horumarinta Xadiiqadaha (Pro Parks Levy), iyo waqabadka weyn ee Ururka Xadiiqooyinka Seattle (Seattle Parks Foundation), waxaad ku arkaysaa bannaan cagaar leh Bartamaha Magaalada oo aan hore lahaan jirin. Xadiiqadda Homer Harris nolol cusub ayeey ku saa’idinaysaa muhiimadda Qorshaha Deegaanka ee Bartamaha Magaalada (Central Area Neighborhood Plan) waxaana ay sharfaysaa mid ka mid ah shakhsiyaadka aad loo jecel yahay, Dr. Homer Harris. Meel ay dadka isugu yimaadiin iyo goob lagu ciyaaro oo loo naqshadeyey in ay taxaddi geliso maskaxda iyo jidhka dadka halkaa yimaada, waxaa ay hawsha naqshadeynta ee xadiiqaddani isu keentay in ka badan 100 qofood. Dr. Harris, oo ka mid ah ciyaartoyda iyo dhakhaatiirta Seattle ee sida aadka ah loo qiimeeyo, waxaa uu si heer sare ah ugu ciyaari jiray Jaamacadda Iowa (University of Iowa) kaddib markii laga cabsi geliyey in uu dhigto Jaamacadda Washington (University of Washington) maadaama uu yahay Mareykan Madaw. Waxaa xigtay in uu galo militariga iyo dugsi caafimaadka, Dr. Harris dhawaan ayuu shaqada ka fadhiistay kaddib markii 43 sanadood uu u shaqeynayey laba jiil ee reer Seattle caafimaadka maqaarka.

### Degmada Caalamka Xarunta Bulshada Chinatown

Iyadoo aad hore loogu riyaan jiray deegaanka Xarunta Bulshada Chinatown qayb muhiim ka ahna qorshaha deegaanka ee 1998, ayaa xaruntan cusub si xaffadeyn leh looga furay Sebtembar 2004. Goobtan cusub ee ay bulshada isugu imaan karto waxaa maalgelisay Maalgelinta Miisaaniyadda Horumarinta Fursadda (Levy Opportunity Fund) iyo Miisaaniyadda Xarumaha Bulshada (Community Centers Levy). Iyadoo ku ag taal Qaybta II ee Goobta Degmada Caalamka (International District Village Square) aqallada qoyska, laan maktabad ah, xafiisyo, ganacsiyo ku yaal goobta gawaarida la dhigan jiray, waxaa ay xarunta qabtaa barnaamijyo dhowr ah oo loogu talagalay da’ kasta, oo badanaa loogu

talagalay deegaanka — karateega iyo legdinta, isboortiga, farshaxanka, iyo munaasibooyinka qoysaska ee gaarka ah.

### Bannaanka Xadiiqadda Magnuson

Bannaankani ee ugu weyn 11 bannaan ee Seattle ku yaal waxaa uu farxad geliyaa qalbiyada eeyaha iyo milkiileyaashooda kaasoo ku yaal xadiiqaddan weyn ee Seattle ku taal oo hore u ahaan jirtay saldhigga ciidanka cirka ee Badda. Waa sagaal hektar oo ay eeyaha ku ciyaari karaan iyadoo ay milkiileyaashooda ku dabaalan karaan kuna sheekaysan karaan, waana bannaanka kaliya ee ay eeyaha ku dabaalan karaan. Waxaa ku yaal dariiqooy ay maraan kursiyada cuuryaanka loogu talagalay, bannaan furan, iyo meel gaar ah oo loogu talagalay dadka aan dooneynin in ay ag joogaan eeyaha weyn. Hagaajinta xeebta waxaa ka mid ah dhagax weyn oo la dhex dhigay iyo alwaax xeebta dejinaysa, caws iyo jiq dhulka lagu beeray, meelo la shamiiteeyay ee socodka loogu talagalay.

### Xadiiqadda Macdanta ee Springs

Meeshan gaarka ah ee Xadiiqadda Albaabka-Waqooyi (Northgate-area park) waxaa ay isugu keenta farshaxanka iyo isboortiga qaab ay isugu darsoomi karaan. Waxaa ay hoy u tahay mid ka mid ah labada bannaanada goolka lagu ciyaaro ee Seattle, halkaasoo dadka xiisaynaya ay ku ciyaari karaan bannaanka loogu talagalay in uu dhirta badbaadiyo islamarkaana soo bandhigo farshaxanka. “Dabiici” ah iyo dhismooyin ayaa dadka badbaadinaya, aqallada, iyo gawaarida ka ag-dhow. Qorshaha Deegaanka Aurora (The Aurora-Licton Neighborhood Plan) waxaa uu u gartay xadiiqaddani in ay tahay mid feejignaan u baahan, waxaana ay qaadatay seddex kulan bulshadeed in naqshadda lagu heshiiyo. Naqshadda waxaa ay kaydinaysaa taariikhda goobta ee aqallada iyo beeraha yar, iyadoo muuqaalka dhirta uu tilmaamayo in taariikhda darbiyada, jaran jarooyinka, warta, iyo geedaha qariibka ah.

Socodka farshaxanka waxaa uu sitaa “Dhagaxa Daruuraha” (Cloud Stones), jawi leh gundhigga kobcinta dabiiciga ah ee loogu talagalay in ay ka aragti bixiso dhaqdhaqaaqa daruuraha, oo uu sameeyey farshaxanlaha caanka ah ee Stacy Levy. Waxaa ay leedahay meelo lagu tamashleeyo oo xiiso leh ee ay dadku istaagaan.



Xadiiqadda Ilaha  
Macdanta



Xadiiqadda Homer Harris

**libsashada Goobta Smith Cove**

Meeshan qaaliga ah ee 7.3 hektar ee biyaha u dhaxeysa waxaa ay ka tarjumaysaa sida ay bulshadu go'aanka u wada gaarto, laguna beddeli karo meel taariikh leh (oo aan markani ula jeedno, hantida Ciidanka Badda ee Mareykanka) bannaan uu qof walba ku raaxeysan karo. Iyadoo saacidaad laga helayo Deegaanka King, iyo Maalgelinta Horumarinta Xadiiqooyinka Shoreline, labada qaybood ee hantida waxaa ay noqon doonaan meel ay xaafaddu isugu timaado. 2.4 hektar ee xadiiqadda sare, waxaa la furay sannadkii 2004 iyadoo loogu magac daray qofka aad u xiiseyn jiray xadiiqadda Magnolia Ursula Judkins, waxaad si fiican uga daawanaysaa dhul biyoodka Elliot (Elliot Bay) iyo magaalada hoose ee Seattle. Xadiiqadda hoose, oo gaaraysa qiyaastii shan hektar, waxaa ay u dhaxeysaa Buundada Magnolia (Magnolia Bridge) iyo Fadhiga Doomanka ee Elliott (Elliott Bay Marina.) Horumarinta waxaa ay qabtaa oo si ku meel gaar ah loogu isticmaali karaa isboortiga dhallinyarada xagga qaybta waqooyi.



Dhibicda Muuqaalka ee Ursula Judkins

dheer ee Space Needle. Waxaa maalgeliyeen Maalgelinta Barbar Dhigga ee Deegaanka (Neighborhood Matching Fund), Deegaanka King, Miisaaniyadda Horumarinta Xadiiqooyinka iyo deeqooyin ay bulshada soo aruuriyeen, waxaa ay ka soo if-baxday aragtida xaafadda, aad ayeeyna u anfici doontaa bulshadan badan.

**Xadiiqadda Aqalka Belltown**

Mararka qaarkood dadka socod ku mara Belltown Cottages waxaa ay is waydiiyaan: maxaa uu aqalkani ka suubinayaa Belltown? Mashruuca waxaa uu ka soo if-baxay bartamaha xaafaddan ballaaranaysa. Aqallada bartilmaameedka ah waxaa ay ka mid yihiin 11-ka aqal ee goobta ku yaal, oo la dhisay sannadkii 1916, kuwaasoo matalaya noocyada aqallada Denny Regrade ee laga soo billaabo 1850-kii illaa 1920-kii. Xadiiqadda waxaa ay matalaysaa sanooyin hawlo aan laga dalin iyo deeq aruurin laga helay Asaxaabta Belltown P-Patch (Friends of Belltown P-Patch), waxaana ay qabtaa qalab farshaxan, dhul 40 boos ah, dariiqyo, iyo bannaan la isugu yimaado. Aqallada, oo sidoodii hore laga dhigay, waxaa ay hoy u yihiin qoraayaasha laga billaabo aqalka Richard Hugo, meel ay yimaadiin qoraayaasha magaalada ee jooga Capitol Hill.



Xadiiqadda Ilaha Ward

**Xadiiqadda Ward Springs**

Xadiiqaddan yar oo ku taal bartamaha Queen Anne waxaa ay ka tarjumaysaa awoodda ay leedahay tallaabada xaafadi ay wada qaadan. Meel mar ahaan jirtay saldhig biyo ayaa haatan ah meel ay dadka isugu yimaadiin oo wada leh dariiqyo weec weecanaya, bannaan cagaaran, qalab casri ah ee lagu ciyaaro, aqal mashiin leh oo taariikhi ah oo la cusboonaysiiyey kaasoo ay bulshada isugu imaan karto, iyo meel fiican oo magaalada laga daawan karo magaalada hoose iyo sarta



Xadiiqadda Ilaha Ward



Xadiiqadda Ilaha Licton



## KAYDINTA WAXA AYNU QIIMEYNO

*Magaalo cusub eel eh bey'ad cajaa'ib ah, waxaynu qiimo gaar ah siinaynaa taariikhda iyo muuqaalka. Kuwani ayaa ah meelo qaarkooda ee aynu "socod ku marnay".*

### libsashada Xadiiqadda Fremont Peak

Xadiiqooyinka waxaa ay iibsadeen hantida kaddib marka uu qof deegaanka ku nool uu soo ogaaday in ay beec tahay, waxaana la adeegsaday deeqooyin gaar ah iyo kuwo urureed, Maalgelinta Barbar Dhigga ee Deegaanka (Neighborhood Matching Fund), Fursadda Maalgelinta, Dakhliga Canshuuraha ee Kaydinta Hantida Deegaanka King (King County Conservation Futures Tax funds.) Xadiiqooyinka waxaa ay ku horumarayaan Fursadda Miisaniyadda Horumarka Xadiiqadaha (Levy Opportunity Funds) iyo Maalgelinta Barbar- Dhigga Deegaanka (Neighborhood Matching Funds.) Si aad looga faa'daysto muuqaalka Puget Sound, Kanaalka Maraakiibta ee Harada Washington (Lake Washington Ship Canal), iyo Buuraha Olympic, waxaa ay xadiiqaddu qabi doontaa meel laga dawdo, muuqaalka dhirta, meelo alwaax leh, dhulka daaqa, dhabbooyinka lagu socdo, iyo daash laga daawado qorrax dhaca.

### Hagaajinta Albaabka Garoonka Ciyaarta ee Hiawatha

Xadiiqadda taariikhiga ah, oo qayb ka ah naqashadda Olmstead iyo garoonka ciyaarta ee Seattle ugu weyn, waxaa uu marqaati ka ahaa dhismaha Xarunta Bulshada Hiawatha ee deriska la ah, ku siyaadinta meel lagu ordo/socdo, ciyaaro/riwaayado dhowr jiil ee da' kasta ah ee ku nool Galbeedka Seattle, haatanna mashruucan ee miisaaniyadda oo muqaal cusub dhirta u sameynaya, waraabka dhirta ee halka laga soo galo, iyo alaab cusub nalal xasuus u ah qorshihii hore e Olmsted.

### Xadiiqadda Horiuchi

Xadiiqaddan cusub waxaa ay qabtaa Xarun Dhexe ee ay dadka xafadda ka arki karayaan Buurta Rainier iyo Togga Rainier, waxaana magac ahaan lagu sharfayaa C. Paul Horiuchi, oo ah mid ka mid ah farshanleyaasha Seattle aad looga qiimeeyo, qaybta aan la qiimeyn karin ee uu ka qaatay noloshu magaalada. Intii aan loo aqoonsan farshaxanle ahaan, Horiuchi waxaa uu ku lahaa garaash gawaarida lagu sameeyo meel laba baloog u jirta xadiiqadda ee ku taal dariiqa 12th Avenue meel u dhow dariiqa Fir Street. Maalgelinta Horumarinta Bulshada (Community Development Block Grant) ayaa bixisay jaran

jarooyinka ku sii jeeda dariiqa Boren Avenue, meel yar ay dadka isugu yimaadiin, dariiq, geedo cusub, muuqaalka dhirta, iyo waraab.

### Xadiiqadda Ilaha Licton

Xadiiqaddan ku taal Albaabka Waqooyi (Northgate) waxaa ay u ahaan jirtay Dhaladka Mareykanka xarun dawo kuwaasoo dhisay meelo lagu dhidido iyo lagu qubeysto biyaha macdanta leh ee ilaha ka yimaada. Markii uu caddaanka soo degay Seattle, iyaguna waxaa ay ku qubeysan jireen ilaha. Goobta waxaa ay ahayd meel dibed-bax cuntada lagu cuno illaa uu E.A. Jensen iibsaday goobta islamarkaana uu ka dhisay goob qubeys dawo leh (spa), waxaana ay xadiiqad noqotay 1960-kii. Ilaha Licton weli waa ay socdaan, waxaana ay soo maraan shub oo dhuuman ku sii daaya kuwaasoo ku dhammaada nidaamka qaada biyaha magaalada. Xadiiqadda waxaa ay qabtaa bannaan weyn ee lagu ciyaaro, kaasoo la horumariyey 1996-dii. Fursadda Miisaaniyadda Horumarinta Xadiiqadaha waxaa ay bixiyeen lacagta beddelaysa dhabbada "Ilaha Iron" (Iron Springs), oo ka mid ah seddexda xadiiqadda ku yaal, oo lagu beddelay mid cusub ay isticmaali karaan dadka naafada ah. Asaxaabta firfircoon ee Ilaha Licton waxaa ay sii wadayaan daryeelka dhulka qooyan ee xadiiqadda.

### Goobta Dabiiciga ah ee Me-Kwa-Mooks

Tan iyo 1993-dii, marka ay magaalada dhaqan gelisay Nidaam Hawleedka Bannaanka Cagaaran (Green Space Policy) si loo dhiirgeliyo kaydinta bannaanka cagaaran, xadiiqooyinka deegaanka, Iskaashiga

Me-Kwa-Mooks, Kaydka Dhulka Cascade, Golaha Bulshada Alki, iyo Xadiiqooyinka Seattle waxaa ay ka shaqeeyeen kaydinta 3.5 hektar ee banaanka cagaaran ee la qiimeeyo ee Galbeedka Seattle. Faa'idada Me-Kwa-Mooks ay keento waxaa ka mid ah kaydinta muuqaalka dhirta dabiiciga ah iyo deegaanka, qaybaha kala duwan



Paul, Jr. and Bernadette Horiuchi





Xadiiqadda Dariiqa Cusub ee Jefferson



Xadiiqadda Buurta Hitt



Goobta Muuqaalka Buurta Baker Ridge

ee isticmaalka dhulka, dhimista dhawaaqa iyo hawada wasakhaysan, biyo mar dabiici ah, iyo baahida yar ee dhismaha qaabka biyaha qaada.

### Goobta Muuqaalka Buurta Baker Ridge

Waa muuqaal kale oo qiimo badan ee ay dadka ku raaxeysan karaan, Goobta Muuqaalka Buurta Baker Ridge waxaad ka helayaa aragti fiican ee galbeedka magaalada hoose, Elliott Bay, iyo Buuraha Olympic. Fursadda Miisaaniyadda Horumarinta Xadiiqadaha waxaa ay bixiyeen lacagta lagu iibsaday dhulka. Bulshadan go'aanka leh waxaa ay heleen Maalgelinta Barbar- Dhigga Deegaanka (Neighborhood Matching Funds) taasoo keentay qorshaynta iyo naqshadeynta xadiiqadda, waxaana ay aad uga shaqeynayaan dhammeystirka deeq aruurinta dhismaha.

## XADIIQAD KA BADAN

*Xadiiqadaha qaarkooda waxaa ay leeyihiin ujeedooyin badan waxaana ay soo bandhigayaan bulshada aynu nahay. Kuwani ayaa ah tusaalooyin feejignaana ka helay miisaaniyadda.*

### Hagaajinta Xadiiqadda Carkeek

Xadiiqaddan waxaa ay qabtaa wax kasta oo ay ku jirto xarunta waxbarashada bey'adda iyo meel ay carruurta ku ciyaaraan, iyadoo muuqaalka deegaanka Puget Sound isbeddel lagu sameeyey kaasoo dadweynaha ay ka helayaan waxyaabo ay ku raaxeystaan iyo wadiiqooyin yareynaya ciidda biyaha webiga yare e Piper, biyaha socda ee qaba ukumaha kalluunka Saalmanka. Wadiiqoyinka la

hagaajiyey, oo ay la socoto dadaalka wax beeridda ee xaafadda, waxaa ay sameynaysaa waddo adag ee dadka iyo xayawaanka la xanaanaysto ka fogaynaysa biyaha webiga yar. Calaamado cusub ayaa kaa saacidaya dadka soo booqanaya in ay qorsheystaan booqashadooda ee juquraafiga iyo aqoonta bey'adda; goob ay ku noolaan karaan xayawaanka duurjoogga; iyo siibista geedaha ayaa suuragelinaya qorshaha maamulka duurka. Haddii aan la heli lahayn taageerada bulshada iyo iskood wax u qabsedayaasha kuwaasoo "ku sii batay" mashruucani ee miisaaniyadda horumarinta, ma aysan suurageli lahayn hawsha badankeeda.

### Garoonka Ciyaarta ee Rainier

Goobtan ciyaarta ee firfircoon, ee sida aadka ah loo isticmaalo, dariiqyo cusub ee la dhammeystiray, calaamado, iyo muuqaalka dhirta ayaa goobta ka dhigaya meel badbaado leh, aadna loo isticmaali karo, soo jiidashana leh. Miisaaniyadda Horumarinta waxaa ay suuragelisay calaamado ku hagaya dadka lugeynaya halka ugu fiican ee badbaadada leh, iyadoo halka laga soo galo xadiiqadda si fiican loo calaameeyey.

### Dariiqa Xadiiqadda Jefferson

Goobtani ee xadiiqadda Olmsted ee ku taal Buurta Beacon waxaa mustaqbalka dhow ku soo fool leh isbeddello. Marka ay Xoogga Korontada ee Seattle aasto warta laga billaabo 2006, qiyaastii 12 hektar oo dhul cusub ayaa ka soo baxaya kaasoo noqonaya xadiiqad la isticmaali karo. Jidka cusub ee 2/3 mayl ay dadka ku lugeeyaan/ordaan waa meel ay dadka jirdhis ku sameyn karaan, waxaana uu isku xirayaa qaybta koofureed ee Xadiiqadda Jefferson.

### Xadiiqadda Buurta Hitt

Xadiiqaddan cusub ee koofur-bari Seattle waxaa ay ka soo ifbaxday Warshadda Dabshidka ee Hitt, taasoo taariikh lahayd laga soo billaabo 1905 illaa ay ka istaagta dabayaaqadii 1970-kii. Marka ay bulshada ay u arkeen goobta meel muhiim ah iyo weliba fursad naadir ah, waxaa ay Xadiiqadaha iibsadeen hantida. Fursadda Miisaaniyadda Horumarinta Xadiiqadaha, Maalgelinta Barbar- Dhigga Deegaanka, Nidaam Hawleedka Khayraadka Dabiiciga ah ee Deegaanka King (the King County Natural Resources Network), iyo kuwo kale ayaa bixiyey kharashka wadiiqooyinka, goobaha daawashada, muuqaalka dhirta, halka xadiiqadda laga soo galo, iyo calaamado ka dhigaya magaaladan geedaha badan meel lagu badbaado.



Garoonka Ciyaarta ee Dugsiga Sare ee Graham



Xadiiqadda Bulshada Magnuson

## DHISMAHA BULSHOYINKA

*Ma jirto wax la mid ah sida ay aragti la wadaago wax u hagaajin karto. Sida ay inala tahay, taa ayaa ah micnaha xadiiqadda, iyadoo ay kuwa soo socda ay yihiin iskaashi cajiib ah.*

### Xadiiqadda Goobta Bergen

Goobtan ka dhex ifaysa bartamaha xaafadda ganacsiga ee Ballard waxaa loo hibeeyey Boqorka Norway Olav sannadkii 1975-tii. 25 sano kaddib waxaa muuqatay gabowga xadiiqadda, mashruuc cusboonaysiin ayaa lagu daray Qorshaha Xaafadda Ballard/Buurta Crown.

Xadiiqadda cusub ee la cusboonaysiiyey, oo haatan ah meel qorraxda u furan ee ay dadka isugu yimaadiin, waxaa ay qabtaa tabakaayo, kuraas dheer ee lagu fadhiisto, muqaalka dhirta ee cusub, koronto, iyo farshaxan cusub. Dusha meesha ay dadka isugu yimaadiin, dhagaxyo garaaniito (dhadhaab) ee tilmaan u ah dalalka Iskaandineefiyaanka kaasoo muujinaya naqshad mid kasta u gaar ah, waxaana uu mid sitaa macluumaadka taariikhiga ah ee Norway. Buugga Jen Dixon “Marqaatiga Geedaha” waxaa uu ku soo xasuusinayaa noloshu dabiiciga ee Iskaandineefiyaanka iyo taariikhda Ballard.



Xadiiqadda Bulshada I Xadiiqadaha Bradner

### Xadiiqadda Bradner

Xadiiqooyinka Bradner waa mid kale ee lagu sharfayo go'aanka iyo hal abuurka bulshada, waxaana ay ku soo dhaweynaysaa dadka soo booqanaya si ka duwan meelaha kale ee Seattle. Xadiiqaddan qurxoon ee Buurta Baker waxaa ay qabtaa xayawaan duur jog ah, Dhul Beereedka Seattle, Qayb lagu magacaabo P-Patch oo ka kooban dhul 61-boos ah, pavilion, meel lagu ciyaaro, garoon kubadda koleyga, mawduuca xadiiqooyinka ee Xadiiqeeyaha Weyn, waxaana naqshadeeyey ardada barta naqshadeynta dhismooyinke ee Jaamacadda Washington.

Kuwani ayaa ah waxyaabo farshaxan noqday: kursi waxaa uu la nooc yahay kalluunka saalmanka, qalabka xadiiqadda waxaa ay u qaabeysan yihiin sida nooc geedo ah, darbiga suuligana waa matxaf! Dhismaha bulshada, oo sannadkii 2003 ka heshay Kulliyadda Naqshadeeyayaasha Mareykanka Abaalmarinta Sharafka, ayaa ah meel ay dadka isugu imaan karaan.

### Xadiiqadda A.B. Ernst

Buurta Fremont oo hore u ahaan jirtay meel aan la isticmaali karin ayaa haatan ah meel la isugu yimaado iyo masrixiyadda bulshada, oo si la yaab leh u soo dhaweynaysa bandhigyada farshaxanka ee aan la qorsheynin ee maalinna aad ku arkaysid maalin kalena aadan ku arkaynin. Darbiyada sawirrada farshaxanka leh ee xadiiqadda, oo qaba muuqaalka dhirta dabiiciga ah, waxaad ka helayaa meel la fadhiisto. Masrixiyadda waxaa qadaysa 150 illaa 200 qofood, waxaadna ka daawan kartaa magaalada hoose ee Seattle. Xadiiqaddan cusub waa meel dadka lugeeya ay isugu imaan karaan oo u dhaxeysa Dariiqada Waqooyi N34th iyo Waqooyi N 35th.

Iyadoo ay ku ag taal Maktabadda Fremont, waxaa xadiiqaddan looga ra'yi bixiyey Qorshaha Xaafadda Fremont, iyadoo islamarkaana miisaaniyadda horumarinta ay bixisay kharashka qorsheynta, naqshadeynta, iyo dhismaha. Magaca la siiyey waxaa lagu sharfayaa A.B. Ernst, oo horraantii qarniga 20-aad xubin ka ahaa Guddiga oo qayb lixaad leh ka qaatay qorsheynta xadiiqooyinka Olmsted ee Seattle.

### Garoonka Ciyaaraha ee Wallingford

Meeshani ee sida aadka ah loo jelcel yahay islamarkaana sida aadka ah loo isticmaalo, oo looga tilmaan bixiyey horumarinta Qorshaha Xaafadda Wallingford waxaa ay la soo baxday aragti cusub. Miisaaniyadda iyo Maalgelinta Barbar- Dhigga Deegaanka ayaa bixiyeen dib u dhiska halka laga soo galo xadiiqadda iyo barkadaha biyaha, rakibaadda qalab lagu ciyaaro ee cusub, iyo goobo daawasho ee cusub



Garoonka Ciyaarta ee Wallingford



Xadiiqadda Beerta Linden

ee ku yaal galbeedka halka laga soo galo garoonka teeniska, muqaal dhir ee cusub, meel lagu socdo oo kuraas leh, iyo miisa cuntada dibed baxa lagu sameysto, iyo nalal. Garoonka Ciyaarta ee Asaxaabta Wallingford waxaa ay sidoo kale ku sameeyeen galbeedka xuduudda xadiiqadda meel cusub ee ay ku yaalliin geedaha dabiiciga ah.

### Beerta Linden

Goobtan qaalgiga ah waxaa ay ahayd hanti uu qof leeyahay, waxaana ay haatan qabtaa muuqaal dhireed, boosas, geedo miro leh, muuqaal dhireed ee cuntamaya, waddo la wada isticmaali karo, meel ay dadka xaafadda isugu yimaadiin, iyo meel ay carruurta ku ciyaaraan. Maalgelinta

lacagta lagu iibsaday waxaa laga helay miisaaniyadda horumarinta, Deegaanka King, iyo Gobolka Washington; maalgelinta horumarinta waxaa laga helay miisaaniyadda iyo Maalgelinta Barbar- Dhigga Deegaanka, deeqooyin ay bulshada soo aruuriyeen. Irrati.

### Xadiiqadda Bulshada e Magnuson

Meel hore u ahaan jirtay goob gawaarida la dhigto, ayaa haatan waxaa ku yaal xadiiqad cajiib ah. Waxaa maalgeliyeen miisaaniyadda, Maalgelinta Barbar- Dhigga Deegaanka, iyo deeqooyin gaar ah, waxaa kaloo ku yaal masrixiyad lagu jilo, waddooyinka dadka cuuryaanka ay maraan, xadiiqad lagu soo bandhigo laguna daryeelo geedaha dabiiciga ah, xadiiqad carruurta loogu talagalay, beer, Qayb lagu magacaabo P-Patch oo ka kooban dhul 135-boos ah, iyo xadiiqad xasilloon. Xadiiqadda waxaa ay taageertaa barnaamijka deeqaha cuntada iyadoo miraha ka soo baxa deeq ahaan u bixisa, waxaana ay dhiirigelisaa in dadku ku raaxeystaan bey'adda qabta qurux, bulsho, nolol caafimaad leh, iyo abaabul.

### Garoonka Ciyaarta ee Dugsiga Buurta Graham

Iyadoo cafis loo jeedinayo Joni Mitchell, goob gawaarida la dhigan jiray ayaa janno noqatay. Garoonka ciyaarta ee dugsiga waxaa uu bulshada u yahay xadiiqad marka uusan dugsiga furneyn. Waxaa la adeegsada maalgelinta miisaaniyadda horumarinta, Maalgelinta Barbar- Dhigga Deegaanka, maalgelinta Xadiiqooyinka Gray illaa Green (Parks Gray to Green funds), deeqda Xarunta Isboortiga Dhallinyarada ee Deegaanka King (King County Youth Sports Facilities grant), iyo dadaalka bulshada, waxaa ay goobta haatan leedahay garoon cagaar leh, seddex goob ciyaar, qalab lagu ciyaaro, geedo dabiici ah, iyo kuraas.

### Xadiiqadda Counterbalance

Ujeeddada fog ee xaafadda Queen Anne waa in xadiiqad laga sameeyo Faras Magaalaha, oo anfacaysa ganacsiyada iyo aqallada. Qaab wadajir ah ayaa suurageliyey in lagu iibsado maalgelinta miisaaniyadda iyo maalgelinta Dakhliga Canshuurta ee Kaydka Hantida Deegaanka King (King County Conservation Futures Tax) meel ku taal kala goyska dariiqa Queen Anne Avenue N iyo dariiqa Roy Street.


Hawl bulshadeed ayaa socota ee lagu naqshadeynayo xadiiqaddan cusub. Waxaa ay ballan qaadaysaa in ay noqoto bannaan khibrad iyo ilbaxnimo sare leh oo ku ag taal goobta taariikhiga ah ee Counterbalance, oo waagii hore ahaan jirtay meel lagu dheel tiro miisaanka gaariga korontada ku socda marka uu buurta fuulayo.



Xadiiqadda Faras Magaalaha Queen Anne



Xadiiqadda Greenwood



Xadiiqadda Aqalka Badbaadada ee Cowen

## JIRITAANKA DHAXALGALKA-YAGA

*Miisaaniyadda waxaa ay xadiiqooyinka u suuragelisay naqshadeynta jiritaanka leh iyo hawlaha horumarinta, kuwaasoo hoos u dhigaya kharashyada dayactirka, yareynaya waxyeellada bey'adda ka soo gaaraya, kordhinaya waxtarka cilmiga xiriirka noolaha iyo bey'adda, sidoo kalena kordhinaya badbaadada iyo caafimaadka dadka soo booqanaya.*

### Xadiiqadda Aqalka Badbaadada ee Cowen

Dhismihii weynaa ee ku yiil xadiiqadda Olmstead, ee la dhisay sannadkii 1909, waxaa uu mar hoy u ahaa rakaabka qaata gaariga korontada ku socda iyo dadka soo booqda xadiiqadda iyo masrixiyadda kooxaha heesaha ay ku dul tumaan hoyga loo cunto tago. Kaddib markii ay ku dhacday dayactir la'aan, xaafadda ayaa cusboonaysiinta muhiimad siisay. Miisaaniyadda horumarinta waxaa uu ka dhigay cusboonaysiinta mid dhab noqota waxaana ay u furan tahay in bulshada ay isticmaasho, iyadoo laga helayo 500 cagood oo wareeg ah oo qol wax lagu qabsado, xafiis qaybta hoose ku yaal, iyo dash wax laga daawdo ee dusha sare ku yaal.



### Aqalka Qubeyska ee Alki

Waxaa ay ka mid tahay meelaha taariikhiga ah ee Alki, waxaana ay haraa ka tahay Pavillion-ka ee goobta laga dhisay sannadkii 1911 ee qubeyska, meelaha alaabta la gashto, xarunta jirdhiska, qololka naadiga, baarka qaxwada, iyo daash wax laga daawdo. Qayb ayaa laga dumiyey sannadkii 1955 kaddibna lama isticmaalin illaa farshaxanle-yaasha deegaanka ay billaabeen in ay u isticmaalaan meel ay ku shaqeeyaan iyo fasal wax lagu barto sannadkii 1990-kii. Asaxaabta Aqalka Qubeyska ee Alki waxaa ay soo aruuriyeen deeq lagu cusboonaysiiyo, iyo deeqooyin kale laga helay miisaaniyadda horumarinta iyo Maalgelinta Barbar- Dhigga Deegaanka, ayaa nolol cusub iyo bannaan waxyaabo badan loo isticmaali karo u yeelay dhismaha, meel lagu sameeyo farshaxanka dheriyada dhoobada ah, meel heesaha lagu duubo, suuliyaal oo dibedda laga soo geli karo. Bulshada waxaa ay haatan ku fool leedahay aqal qubeys leh ee ay ku qaadan karaan fasallada jirdhiska, barnaamijyada bey'adda, munaasibooyinka dhallinta, iyo xaffadaha.



Aqalka Qubeyska ee Alki



Garoonka Ciyaarta Genesee



**Xadiiqooyinka Aqalka Qubeyska ee Dahabiga ah**

Goobta qurxoon ee ku tirsan Puget Sound ee Xadiiqadda Dahabiga ah, Aqalka Qubeyska dib ayaa gebi ahaantiisa loo cusboonaysiiyey iyadoo la isticmaalay lacagta miisaaniyadda horumarinta iyo Maalgelinta Barbar- Dhigga Deegaan. Iyadoo mar ay lahayd qubeys iyo qol ay alaabta gashtaan dadka xeebta aadaya, waxaa ay haatan tahay bannaan dhowr waxyaabood ay bulsahda u adeegsan karaan barnaamijyada dhallinta, fasallada bey'adda ee xoogga saaraya bey'ad badeedka, gobo cusub ee lagu ciyaari karo ama lagu fikir karo, iyo meel munaasib ku ah kulannada bulshada.

**Garoonka Ciyaarta ee Meadowbrook**

Maalgelinta miisaaniyadda horumarinta ayaa suuragelisay dib u cusboonaysiinta ee garoonnada 2 iyo 3 ee ku yaal Meadowbrook, halkaasoo lagu ciyaari si ka fiican oo badbaado leh loogu ciyaari karo ciyaaro gacmeedyada softball iyo baseball. Hawsha, oo xasaasi ku ahayd wabiga yar ee Thornton, waxaa la socday dhismaha aasaaska, carro cusub oo lagu shubo iyo qaababka biyo marriinka, beddelista deydka, rakibaadda deyd badbaado leh, beddelista dusha sare ee goobta, iyo caws/cagaar la saaro.

**Garoonka Ciyaarta ee Genesee**

Mashruuca ugu horreeya ee miisaaniyadda horumarinta ee la dhammeystiray, garoonnadan qurxoon ee lagu ciyaari karo aad ayaa haatan loogu baahi qabaa. Waxaa maalgelisay miisaaniyadda horumarinta, Maalgelinta Kaydka Wadajirka ah (Cumulative Reserve Fund), iyo deeq ay bixisay Deegaanka King, waxaa uu mashruuca wataa beddelka Garoonka # 2 laga beddelayo cawska oo loo beddelayo Cawska la Saaro, badbaadada deydka, dib u qaabeynta goobta gawaarida la dhigto, meelo lagu socdo oo la hagaajiyey, dhir la beero, jid-gooyo horumarinaysa badbaadada waddada mashquulka ah ee koofurta S Genesee Street, iyo nalal casri ah oo loogu talagalay Garoonnada 1 iyo 2.

**Horumarinta Xadiiqadda Dhulka Qooyan ee Roxhill**

Meeshan taariikhiga ah ee dhulka qooyan ka tirsan Webiga-yar ee Longfellow dhulka hoose ee qooyan ee dhirta leh waxaa ka buuxay wasakh kaga timid dhismo ku



Xadiiqadda Dhulka Qooyan ee Roxhill

dhawaa sannadkii 1960-kii. Qorshaha Tallaabo Ka Qaadista Biyo Ka Saaridda Webiga-yar ee Longfellow ee sannadkii 1992 ayaa waxaa uu amray dib u dhiska dhulalka qooyan, iyadoo sannadkii 1996 Golaha Bulshada Westwood ay billaabeen in ay qorsheeyaan. Miisaaniyadda dib u dhiska seddexda dhul ee qooyan oo ku siyaadinaya dhulalka qooyan in ka badan 40,000 geed oo dabiici ah, garoon cusub ee lagu ciyaaro, meel dibed bax ahaan cuntada loogu cuno, wadiiqooyin iyo buundooyin, iyo bannaan lagu kulmo. Asaxaabta Dhulka Qooyan ee Roxhill waxaa ay haatan ku taageeraan dib u dhiska socda xaflado bil kasta ah.

**Xadiiqadda Greenwood**

Bulshada Greenwood ayaa markii hore soo jeediyey goobtani, halkii hore u ahaan jirtay, in xadiiqad laga dhigo 50 sano ka hor, waxaana la socday Qorshaha Xaafadda Greenwood/Phinney Ridge (Greenwood/Phinney Ridge Neighborhood Plan). Naqshadeynta iyo dhismaha waxaa bixiyey miisaaniyadda horumarinta iyo Maalgelinta Barbar-Dhigga Deegaanka, iyo deeq ay bixisay Deegaanka King. Xadiiqaddan qurxoon waxaa ay qabtaa dhul daaq ah, meel la isugu yimaado, suuli, meel xusaysa Gawaarida Korontada ku socda ee Magaalada, fadhi la shubeeyey, deyd, kuraas, miisas lagu cunteeyo, meel wax lagu beero, iyo calaamado la fahmi karo. Sidoo kale waxaa ay leedahay dhul qooyan ee ay Xoogga Korontada ee Seattle rajaynayso in ay ku xirto Webiga Piper si looga faa'idaysto biyaha tayada leh ee laga heli karo.

**Xadiiqadda Xayawaanka ee Woodland.**

Maalgelinta miisaaniyadda waxaa ay suuragelisay in xadiiqadda xayawaanka ay dhammeystiraan qaar ka mid ah mashaariicda islamarkaana ay isku hawliyaan kuwo kale inta ay ku guda jiraan hor u socodka Qorshaha Horumarinta Mustaqbalka Fog (Long-Range Physical Development Plan). Tan iyo billawgii miisaaniyadda, xadiiqadda xayawaanka waxaa laga dhammeystiray halka laga daawdo Shabeelka Dhulalka Barafka leh, dib u dhis iyo shabaqyo ee halka laga daawado Dhulalka Qooyan, waxaa ay dhammeystireen Red-Crowned Cranes, iyagoo dib u qaabeeyey Beerta Maroodiga (Elephant Barn to accommodate the protected contact protocol) si halkaasi xafladaha loogu qabto.



Waxaa lagu daabacay waraaqo dib loo warshadeeyey kaddib marka 25% ay macaamilka isticmaaleen iyadoo 50% ay ka sameysan tahay alaab dib loo warshadeeyey; taasoo ka sare martay heerka u degsan Magaalada Seattle.

**FOREIGN LANGUAGE TRANSLATIONS AVAILABLE**

The Pro Parks Levy Mid-Term Report is also available in eight other languages. You may view copies by visiting the webpages listed below for each language, or you can call (206) 233-7929 and have one sent to you.

Este informe se encuentra disponible en español. Para ver una copia del informe, puede visitar [www.seattle.gov/parks/proparks/report/Spanish.pdf](http://www.seattle.gov/parks/proparks/report/Spanish.pdf) o puede llamar al (206) 233-7929 y solicitar que se le envíe una copia.

Ang report na ito ay mayroon sa Tagalog. Upang makita ang kopya ng report, maari kang bumisita sa [www.seattle.gov/parks/proparks/report/Tagalog.pdf](http://www.seattle.gov/parks/proparks/report/Tagalog.pdf) o maari mong tawagan ang (206) 233-7929 at humiling ng kopya na ipadala sa iyo.

Waxaad warbixintani helaysaa iyadoo Af Soomaali ah. Si aad u aragtid koobiga warbixinta, waxaad soo booqan kartaa [www.seattle.gov/parks/proparks/report/Somali.pdf](http://www.seattle.gov/parks/proparks/report/Somali.pdf) ama waxaad wici kartaa (206) 233-7929 waxaadna codsan kartaa in koobi lagu soo diro.

**እዚ ሓበረታ እዚ ብቋንቋ ትግር ክትረክ ብዎ ትክ እሉ ኢኩ -ም። ቅዳሕ ናይዚ ሓበረታ እዚ ክትረክ ቡ ኣብ ኢንተርኔት**  
[www.seattle.gov/parks/proparks/report/Tigrina.pdf](http://www.seattle.gov/parks/proparks/report/Tigrina.pdf) **ክትረክ ብዎ ትክ እሉ ኢኩ -ም። ወይ ድማ ተለፎን ኣብ ቁጽሪ (206) 233-7929 ተለፎን ደዊልኩም**  
**ቅዳሕ ክስደደልኩም ክትሓቱ ትክ እሉ ኢኩ -ም።**

Bản báo cáo này có bằng tiếng Việt. Để xem một bản sao của bản báo cáo này, quý vị có thể đến [www.seattle.gov/parks/proparks/report/Vietnamese.pdf](http://www.seattle.gov/parks/proparks/report/Vietnamese.pdf) hoặc quý vị có thể gọi số (206) 233-7929 và yêu cầu được một bản báo cáo gửi đến cho quý vị.

Gabasaan kun Afaan Oromo itti jira. Koopii gabasaa kanaa ilaaluf, [www.seattle.gov/parks/proparks/report/Oromo.pdf](http://www.seattle.gov/parks/proparks/report/Oromo.pdf) seenu dandeesa; ykn ati (206) 233-7929 waamte koopiin tokko akka siif ergamu gaafachu ni dandeesa.

此報告有中文版本提供。要查看此報告的副本，可以瀏覽 [www.seattle.gov/parks/proparks/report/Chinese.pdf](http://www.seattle.gov/parks/proparks/report/Chinese.pdf)，或致電 (206) 233-7929，請求寄給您一份副本。

ይህ ዘገባ በሎማርኛ ይቀርባል። የዘገባውን ኮፒ ለመመልከት [www.seattle.gov/parks/proparks/report/Amharic.pdf](http://www.seattle.gov/parks/proparks/report/Amharic.pdf) ሊገቡ ወይም (206) 233-7929 ደውለው ኮፒ አንዳላክልዎት ሊጠይቁ ይችላሉ።



**SEATTLE PARKS  
AND RECREATION**

800 Maynard Ave S, 3rd Fl  
Seattle, WA 98134-1336

PRSR STD  
US POSTAGE  
PAID  
SEATTLE, WA  
PERMIT NO 900